



ALMA: Taageerada Bulshada ee Qoysaska Haysta Carruurta yaryar

Taageerada Qoysaska
Isbaanishka, Soomaalida,
Carabta iyo Fiyeednaamiiska

Alma waa barnaamij bilaash ay ku helayaan qoysaska sugaaya ilmo dhalan doona ama ay u joogaan carruur gaaray ilaa da'da 3 sano. Barnaamijku wuxuu taageerada u wehel yeelida siiyaa hooyooyinka, aabeyaasha, awoowe/ayeeyooyinka, daryeeleyaasha iyo masuuliyiinta carruurta. Alma wuxuu baraa xirfadaha ka caawinaaya hooyooyinka, aabeyaasha, ama daryeeleyaasha kale inay hormar sameeyaan ayna si guul leh u taageeraan qoysaskooda. Alma ayaa ku baraya xirfadaha aad u baahan tahay si aad ugu xirnaato carruurtaada aadna u taageerto faya-qabkooda, kobacooda, iyo guushooda.

Xubin kamid ah bulshada oo lagu tababaray barnaamijka Alma ayaa qoysaska kula kulmaaya guryahooda, xafiiskeena, ama goob deegaanka ah si uu u baro uuna ugu tababaro xirfadahaan.

Alma waxaa heli kara qoysaska ku nool Koonfur galbeed Denver iyo deegaannada dariska la ah.

Faa'iidooyinka barnaamijka:

- 7-10 kulan oo taageero fool ka fool ah lagu bixinaayo
- Xirfado cusub si loo taageero farxadaada iyo faya-qabkaaga
- Ku xirmida ilaha bulshada
- Xogta iyo xariirada hormarinta ilmaha



Si aad u hesho xog dheeraad ah aadna uga qaybgasho, wac ama fariin qoraal u dir **Leyla oo aad ka wacayso (720)772-9217** oo ku baxaaya Soomaali iyo Ingiriis

✦ SU`AALAHA INTA BADAN LA LSWEYDIYO ✦

Maxaan Alma u gaarsiinaynaa bulshada?

Waxaan dooneynaa in hooyooyinka, aabeyaasha, awoowe/ayeeyooyinka, daryeeleyaasha, iyo masuuliyiinta ubadku ay dareemaan taageero. Waxaan dooneynaa inay helaan xirfado ay ku taageeraan ilmahooda inta ay korayaan.

Maxay Booqashooyinka guriga Muhiim u yihiin?

Booqashooyinka guriga ayaa naga caawinaysa inay fududaato ayna raaxo u noqoto dadka ka qaybgalaaya barnaamijka. Waxaan sidoo kale iskugu imaan karnaa meelaha kale sida beeraha raaxada, maktabadaha, maqaayadaha, iwm. Waxaa jiri doona todobo ilaa toban booqasho oo la isku baranaayo, wax lagu baraayo, loogana baranaayo Alma si wadajir ah.

Yaa fulinaaya Booqashooyinka guriga?

Booqashooyinka guriga waxaa fulinaaya saaxiibada bulshada. Saaxiibka bulshada ayaa loo doori doonaa hooyo, aabe ama daryeele kasta si uu u waafaqo dhaqankooda ama dookhyadooda gaarka ah.

Waa meeqa qiimaha barnaamijku?

Alma waa lacag la'aan! Wax qarash ah ugama baxaayo qoysaska doonaaya inay ka qaybgalaan.

Ma dagani Koonfur Galbeed Denver, laakiin waxaan daganahay Denver (ama magaallo kale)?

Waxaan ka shaqaynaa meel ka badan Koonfur Galbeed Denver laakiin waxaan ku faraxsan nahay inaan aqbalno qoysaska ku nool deegaannada nagu xeeran ama aan ku xirno barnaamijka Alma ee heer gobal.

Waan fiican nagay, ma dareemaayo walaac ama murug badan.

Uma baahnid inaad is walaaciso, walwasho, murugooto, kelinimo dareento, ama wax kuwaas lamid ah si aad uga qaybgasho Alma. Yoolkeenu waa inaan taageerno daryeeleyaasha bulshada ee uurka leh ama ay u joogaan ilmo ilaa 3 sano gaaray. Waxaan siin karnaa taageero iyo ilaha kale iyo in sidoo kale lagu baro xirfado ku caawinaaya mustaqbalka haddii aad u baahato.

Ma waxaad tahay baxnaaniye/dhakhtar/khabiirka cilmi nafsiga/iwm?

Maya, Waxaan nahay koox bulsho ah oo tababaran. Tani waxay ka dhigan tahay in saaxiib kasta oo bulsho lagu doortay awoodiisa isku xirka qoysaska ku nool Koonfur Galbeed Denver asagoo raaxaaya luuqadaha ay wadaagaan, asalka, ama dhinacyada kale waxaana loo tababaray dhaqan gelinta farsamooyinka ka jira Alma. Waxaan sidoo kale helnaa tababar socda oo joogto ah oo lagu barto xirfadaha Alma iyo khayraadka ah.

Waa maxay shuruudaha ka qaybgalku?

Barnaamijkaan waxaa loogu talagalay waalidiinta, qoysaska, daryeeleyaasha doonaaya inay bartaan xirfado cusub si ay taageero fiican u siiyaan sanadaha hore ee noloshu cunugooda. Qoysaska ayaa haysan kara ilmo wayn sidoo kale, laakiin ugu yaraan hal cunug waa inuu ka yar yahay 3 sano.

Waa maxay xogta aad iiga baahan tahay?

Waxaan u baahan nahay keliya xog aasaasi ah sida magacaaga iyo ciwaankaaga. laakiin uma baahnin lambarada Social Security, ama xog kasta oo dawladu bixiso oo kale. Xogtaada waa la dhawri doonaa, uma sheegi doono xogtaada, khibradahaaga, ama xaaladaada qofna.

Muddo intee dhan ayuu soconayaa barnaamijkaan?

Waxaan la galnaa 7 ilaa 10 kulan daryeeleyaasha. Waxaan ku mudaynaa kulannada qaab ku salaysan baahiyahaaga iyo helitaanka. Tan ayaa ka dhignaan karta halmar asbuucii ama labadii asbuuc ba mar, taasoo ka dhigan kulanno soconaaya labo ilaa afar bilood.

Maxaa dhacaaya kadib marka kulannadu dhammaadaan?

Ka qaybgaleyaasha waxaa lagu casuumayaa inay ka qaybgalaan xubnaha Alma, tan waxaa ku jiri kara munaasabadaha, casharada, taageerada raadinta khayraadka iyo adeegyada, iyo ku xirmida qoysaska kale iyo kooxdeena.

